



22-ka Oktoobar 2021

Gacaliyaha Waalidka / Daryeelaha Ahow,

Waxa aan mar labaad Liverpool ku arragnaa welwel laga qabo turrada lahaan-kaca COVID (Kofid) oo sii kordheysa iyada oo inta ugu badan laga helay ardayda iskuulka. Waxyeelada COVID waa halis qof walba ku soo wajahan. Lahaan-kac sii kordha micnhiisu waa caruur badan jirata, u baahan inay saaxiibadood iska go'doomiyaan, waxbarasho carqaladeyntsanta iyo tallaabooyinka wax xaddidaada oo mar kale teeramka soo socda iskuulada lagu fuliyo.

Waxa aan rabnaa in aan kaaga mahadcelino taageeradaada iyo in aan waxqabad hadda kaa codsano. Nagu kaalmee in aan teeramka soo socda ilmahaaga u badbaadino, goorta uu saaxiibadiis iskuulka la joogana waxyeelada uu COVID mustaqbalka natiisa gaarsiin karo u yareyno adiga oo hadda ku tallaabsanaya dhowr tallaabo oo fudud.

Ma jirto tallaabo kaamil ah, oo sidaas darteed baan ku tallineynaa ku tallaabsiga dhowr tallaabo oo si taxadir leh loo soo huley, kuwaas oo aan dareensan nahay inay waxyeelada ugu yar gaarsiin doonaan waxbarashada iyo inay yihiin kuwo dhimi kara halista jiro isku gudbinta – laakiin si ay kuwan u shaqeeyaan waa in uu qof walba hadda doorkiisa dheelo.

Laga bilaabo teramka soo socda, waxaa lagu tallinayaa inay gafuur-xirka xirtaan ardayda, shaqaalaha iyo waalidiinta/daryeeleyaasha goorta goobaha dadka ka dhexeeya la joogo, laakiin ma aha gudaha fasalka. Waxaa kale oo aan codsaneynaa in gafuurka la daboosho marka ilmaha iskuulka laga kaxeeynayo ama la keenayo, way jiraan shuruudo tan looga baaqsan karo. Maadaama aan Qaboobaha/Jilaalka galeyno, kiisaska oo sii badanaya micnaheedu waa inay tallaabadan lama huraan noqotey. Marka aanan bulsho ahaan kala fogaan karin ee aan gudaha ku jirno ama aan joogno meel ay dadku ku badan yihiin gafuur-xir xirashada waa sida ugu waxtarka badan ee lagu yareyn karo virus (fiirus) qaadista iyo faafintiisaba.

Xitaa dadka da' yarta ah, tallaalka waa safka hore ee aan COVID isaga difaaceeyno. Tallaalista kuwa 12 ilaa 15 sano jirka ah, waa wax aan ku rajeyneyno in lagu dhimo COVID isku gudbinta, laakiin tan waxa ay waxtareysaa keliyah marka iskuul walba iyo fasal walba laga tallaalo tiro wax ku filan. Istallaalista la ogolaadey ee koox da'eedkan loogu talloagalay waxaa la qorsheeyey in iskuulka lagu sameeyo hadda ilaa bisha Disembar – iskuulkaaga ayaa goorta ku soo ogeysiin doona.

Xitaa haddii aan horey lagu soo baarin, waa hadda goorta ay tahay inaad bilowdo. Waa lama huraan in aad adiga iyo ilmahaaga aad weli isticmaashaan baaritaanka labadii toddobaadba mar ah ee jirada lagu baarayo natiijadana waa inaad u soo sheegtaa goobta ah (<https://www.gov.uk/report-covid19-result>) oo haddii lagaa helena iskuulka u soo sheeg. Sii wadista joogto isku baarista goorta fasaxa half-teram ka lagu jiro waxa ay wax ka tareysaa dhimista halista lahaan-kac qaadista loogu jiro marka iskuulka lagu laabto.

Ahow Mid COVID Ka Badbaadsan. Dhowr tallaabooyin kale oo saa'id ah oo halista lahaan-kaca lagu qaadi karo lagu dhimi karo waa in gacmaha la dhaqdo ama jilicsane (gel) lagu nadiifiyo, banaanka oo bulsho ahaan loogu kulmo iyo qolka lagu jiro oo hawada loo furo. Haddii aad isku arragto callaamadaha COVID, waa lama huraan in aad markaasba is-go'doomiso, sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtoogalka ahna u soo qaadato aalada PCR test ee baaritaanka lagu sameeyo oo iskuulkana u sheeg.

Waxa aan dhamaantiin idin rajeyneynaa inaad COVID ka badbaadaan oo aad fasaxa half term ka ah ku raaxeysataan.

Waa Daacad kuu ahaade

Matt Ashton

Agaasimaha Caafimaadka Guud

Steve Reddy

Agaasimaha Adeegyada Caruurta